

Falanqeynta Qorshaha Gobolka

Gugii 2021

Qorshe-sameynta & Falanqeynta

Warbixin Kooban

- Beddelaadda tirada dadka iyo hoos u dhaca joogtada ah ee tirada ilmaha dhalanaya ayaa saameyn ku yeelanaya guud ahaan diiwaangelinta DPS.
- Maaddaama la dhisayo guryo cusub kororka tirada dadka ayaa weli ka gaabineysa meelo badan oo magaalada ka mid ah, sababaha keenaya hoos u dhaca diiwaangelinta ardeyda ayaa ka culeys badan wixii horay u jiri jiray.
- Dhibaataadii xanuunkii safmarka ahaa awgiis ayaa ka sii daray hoos u dhaca diiwaangelinta dugsiyada hoose ee gaar ahaan deegaamada Koonfur-galbeed, Waqooyi-galbeed, iyo Bartamaha magaalada.
- Dugsiyada dhexe ee ku yaalla deegamadaas waxay bilaabi doonaan inay la arkaan saameyn muuqata oo ah hoos u dhaca diiwaangelinta 5-ta sano ee soo socota iyada oo heerarka hoos u dhaca ah ay la mid yihiin wixii aan ku soo aragnay heerarka dugsiyada hoose 5-tii sano ee la soo dhaafay.
- Ardeyda ku jirta ECE iyo barbaratooniga ama Kindergarten waxay sii wadanayaan in ay kala doortaan iskuullo ka baxsan DPS, oo arrintaasna si weyn ayey u saameyneysa diiwaangelinta guud.